



Sidii Dhawrista Sharcigu U noqon lahayd Xaqiiqo ay Helaan Carruurta Ku Eedaysan Danbiyadu

12 April 2021

Way fududahay kharashna kuma kacayso in la sameeyo isbadel deg-deg ah, la taaban karo oo micno leh si carruurta Somaliland ee lagu soo Eedeeyo dambiyada loola dhaqmo si Cadaalad iyo Bini Aadantinimo leh oo macquul ah.

Xeerarka ciqaabta ee Somaliland waxa ay dejiyeen hannaan sharci oo illaalinaya carruurta lagu eedeeyo danbiyada. Balse carruurta inta badan ma helaan dhawristaa sharci.

Warbixin ay Maanta soo saartay Horizon Institute, *Sidii Dhawrista Sharcigu U noqon lahayd Xaqiiqo ay Helaan Carruurta Ku Eedaysan Danbiyadu* waxa uu faahfaahin ka bixinaya tallaabooyinka iyo habka ugu kharashka yar ee loo hirgelin karo iyada oo aan dib u dhac ku imanayn si loo xaqiijiyo in nidaamka caddaalad ciqaabeedku fulinayo dhawristaas. Warbixintani waxa ay si toos ah ula hadlaysaa kuwa ka masuulka ah fulinta xeerarka – booliska, xeer-illaalinta iyo garsooreyaasha– xogtuna waxa ay ku salaysan tahay waayo-aragnimadii *Horizon Institute* ka heshay bixinta kaalmada sharci ee carruurta xidhan iyo qoyskooda.

Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta waxa uu dhigayaa aasaaska dhismeyaal u gaar ah carruurta sida maxkamaddaha iyo xabsigyada. Kharashka dhismaha, qalabaynta iyo shaqaalaha hay'adahani waxa ay ku adkaadeen xukuumadihii kala danbeeyey. Maadaama loo arko dhismaha maxkamaddaha iyo xabsigyadu in ay yihiin tallaabadii koowaad ee lagu fulin lahaa sharciga, carruurta iyo ehelkooda waxa laga duudsiyey faa'iidadii ay ka heli lahaayeen xeerarkaas. Carruurta ku eedaysan danbiyada waa in aan lala sugin inta la hirgelinayo kaabayaashaas qaaliga ah waana in ay ka sii faa'iideystaan xeerarkaas. Waaxaha caddaaladdu waxa ay fulin karaan Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta, xataa kuwa u baahan in la helo dhismeyaal cusub, iyagoo ka duulaya hantida kooban ee ay haystaan.

Aasaaska Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta ee 2007 waxa uu ku salaysan yahay fahanka in carruurta, 17 jir iyo ka yar, ayna ahayn qaar mudakar ah sida dadka waaweyn ee 18 jir ama ka weyn. Maadaama ay carruurta korayaan jidh ahaan, caadifad ahaan iyo maskax ahaan, sharcigu waxa uu qeexayaa in falcelin kasta oo laga bixinayo qaladkaa ay sameeyeen uu ka duwanaado iyada oo lagu xisaabtamayo xaqiiqadaas. Carruurta da'doodu tahay 14 ama ka yar gabi ahaanba malaha masuuliyad dambi. Dhallinyarta 15 illaa 17 jir ah, xadhigoodu waa in uu noqdaa tallaabada ugu danbaysa ee la qaadayo, xukunka ugu dheer ee lagu ridi karaana waa in uu noqdaa 15 sanno.

Warbixintani waa qaybtii shanaad oo kamid ah taxane shan qaybood ka kooban, *Fashil-wadareed: Sida uu Hanaanka Cadaaladda Danbiyada ee Somaliland uu u Waxyeelleeyo Carruurta iyo Waxa aan Ka Wada Qaban Karno*. Taxanihii Koowaad ilaa kii afraad waxay diiradda saarayaan waxa ay dadweynuhu samayn karaan si ay u saxaan qaladaadkaasi. Warbixintan u danbaysa ujeedadeedu waa in falanqaynta lagu soo daro booliska, xeer-illaalinta, garsooreyaasha iyo laamaha kale ee xukuumadda. Carruurta Somaliland waxa ay u qalmaan in ay helaan nidaam caddaalad ciqaabeed oo ula dhaqma in ay yihiin carruur. Dhammaanteen, haddii aynu ka shaqayno laamaha xukuumadda ama aynu nahay xubno kamid ah dadweynaha waynu kawada qayb qaadan karnaa xaqiijinta hadafkan.

Si aad u akhridid warbixin, [guji halkan](#).

Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyayaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.

Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org iyo telefoonada +252 523603 / 0634717933